



### **Kusoo Dhawaaw Jarmalka!**

kaliya September 2015 waxaa yimid 164,000 oo qof, kuwaas oo halkaan u noqotay Hoy cusub.

Dowlada Jarmalka iyo dad iskood isku abaabulay ayaa isku dayaya in eey caawiyaan cidkasta, inta karaankooda ah, hasa,ahaatee tirada dadka imaanaya oo aad u badan ayaa keeneysa in eey mararka qaarkood adkaato in qofwaliba si cadaalad ah loo caawiyo.

Hadaba si aad u,ogaato, wax yaabaha adiga ku quseeya iyo waliba Su,aalaha ugu horeeya ee aad isweeydiin karto Jawaabahooda, ayaan si kooban kuugu diyaarinay !

#### Maxaa dhacaya hadaba?

Marba hadii aad timaaday Jarmalka, waxaad codsan kartaa Megengalyo, adigoo isku dhiibayaya Maamuladaan soo socda:

Dhanka Xuduuda Jarmalka, waxaad isku dhiibi kartaa

.Maamulka Xuduudaha

.Booliska

.Iyo waliba Hay,adaha Dowliga ah ee kale, ee Qaxootiga qaabilsan.

Kadib waxa eey kuu dirayaan halka dadka cusub lagu qaabilo, halkaas oo ah meel (aad u weyn oo uu Silig ku xiranyahay), hadaba halaas ayaad ku noolaaneysaa 3 da Bilood ee kugu horeeysa Wadankan Jarmalku.

Halkaas ayaa laguugu diiwaan galin doonaa (iyadoo waliba laguugu fidin doono baaritaan xaga Caafimaadka ah, waxaa kaloo lagaa qaadi doonaa Sawir si laguugu sameeyo Kaarka aqoonsiga).

Wasaarada socdaalka Dalka Jarmalka ayaa ku Su,aali doonta, sababta aad Megangalyo uga codsaneeyso Jarmalka, kadib, waxa eey ku siinayaan ogolaasho kooban, oo aad ku joogi kartid Dalka Jarmalka, ilaa lagaa gaarayo Go,aan codsigaaga.

3 Bilood kabacdi, waxaa laga yaabaa in lagu bedelo, Gobol kamid ah Gobolada Dalka, Gobolka uu doono ha,ahaadee.

Waxaa laga yaabaa in kaligaa Guri lagu siiyo ama Qofkale in lagula dejiyo, halkaas oo aad ku noolaan doontid inshallah inta eey Dowlada Jarmalku Go,aan kama dambees ah kaa gaareeyso.

#### Waxaa jooga Jarmalka ama Yurub Familkeyga!

Qaar kamid ah Qaxootiga, waxa eey codsadaan in la geeyo halka eey Qaraabadooba degan yihiin.

Muhiimada Koobaad, waxaa iska leh Dadka Xaas ka ah iyo Ciyaalka.

Hasa,yeeshee waa Muhiim in aad u,sheegto Dowlada hadii aay Qaraabadaada aay Jarmalka ama Yurub joogaan, oo dooneysid in aad la noolaatid. Waxaan horay iskaaga soo diiwaan galiyay Wadan kamid ah Wadamada Midoowga Yurub, oo aan

#### Megangelyo kasoo codsaday!!!

Jarmalku wuxuu Arji u diri doonaa Wadankaas aad iska soo diiwaangalisay, kadib waxaa dhici karta in uu Jarmalka Wadankaas kuugu celiyo, si aad Megangalyo uga hesho,Wadankaas ayaadne xaq ku leedahay.

#### Goormaan aadi karaa Shaqo?

3 da Bilood ee kuugu horeeysa Jarmalka laguuma ogola in aad shaqeysato. Xitaa kabacdi aad ayeey u adag tahay, si aad ku hesho Shaqo, maxaa yeelay Sharciga Dalka ayaa dhigaya in Shaqo lasiiyo marka hore Dadka Jarmalka ah, Dadka u dhashay Wadamada kale ee Yurub ee dagan Jarmalka,ama dadka loo aqoonsaday Qaxootiga ee ku nool Dalka Jrmalka. Caadiyan waxaad u baahantahay hadii aad dooneysid in aad shaqeysato, ama aad Shaqo barato Ogolaanshaha Shaqada, taas oo aay bixiso Wasaarada Shaqada ee Dalka Jarmalka.

#### Talooyin Muhiim ah iga hoo !

-Waa in aad marwaliba wadatid Aqoonsigaaga !

-Dowladu waa in eey ogaato marwalba halka aad dagantahay!

-Markasa oo aad Dokumeenti dhiibeysid kasameeyso Koobi!

-Hadii eey Boosto kuu soo dhacdo, waa in aad marwalba si dhaqsi ah u furtid, hadii aad fahmi weeysid,fadlan raadso cid kuu Fasirto oo kaa caasiwo.

-Hadii aad Su,aalo qabtid, soo dhawaaw waliba si farxadi ku jirto kusoo dir E-Mailka hooso ku qoran:

eva@heimatstern.org

**Waxaan kuu rajeeynayaa bilaaw fiican Dalka Jarmalka.**